

## **Waxa loo baahan yahay in aad ka oggaato soo gudbinta Foomka Cabashada Xuquuqda Darawalka**

**Ma haysataa foomka saxda ah? U isticmaal foomkan in aan ku soo gudbiso cabasho ku saabsan:**

- Magdhowga ugu yar ee aanan la bixin.
- Bakhshiishka iyo lacagah mahadnaqa ee aan la bixin.
- Lacagta fasax la'aan mushaarka looga jarey.
- In aanan la awoodin in uu kuu ururo ama la isticmaalo waqtiga bukaanka ee mushaarka leh.
- In aanan lagu siin lacagaha waqtiga bukaanka ee mushaarka leh.
- Ogeysiiska waqtiga bukaanak ee mushaarka leh.
- Bixin la'aanta lacagaha loo bixiyo ka gudubka buundooyinka, ujuurooyinka, ama lacagaha dheeraadka ah ee la saaro iibka ama qofka.
- Ogeysiiska xuquuqda.
- Ogeysiisyada xuquuqda oo luuqadda aan doorbidayo ah.
- Rasiidyada darawalka.
- Ogeysiisyada safarka ee toddobaadlaha ah.
- Aargoosiga shirkadda gaadiidka la wadaago ee aniga iga dhanka ah.
- Kuwo kale – fadlan ku sharrax Qaybta C.

**Haddii cabashadaadu ay wax kale ku saabsan tahay, eeg [Hagaha Cabashada](#) si aad u oggaato foomka ay tahay in la buuxiyo.**

**Dhammaan darawalada gaadiidka la wadaago ee Washington, iyada oo aan la eegayn xaaladooda socdaalka, ayaa waxay leeyihiin xuquuq sharci oo ay ku soo gudbiyaan Cabashada Xuquuqda Darawalka.** Waxaan baaritaan ku sameyn karnaa cabashooyinka magdhowga ee 3 sano gudahooda laga soo bilaabo taariikhda ay ahayd in lacagta lagu siiyo, laga bilaabo 1-da Jannaayo, 2023. Xuquuqdaada ka oggow [www.Lni.wa.gov/TNCDrivers](http://www.Lni.wa.gov/TNCDrivers).

**Talooyin loogu talagalay buuxinta foomkan:**

- Iskuday in aadan wax su'aalo ah ka boodin. Si cad oo dhammeystiran u buuxi foomka. Hadba sida ay u badan yihiin macluumaadka aad ina siiso, waa sida ugu dhaqsiiyaha badan ee aan kuu caawin karno.
- Noo soo dir dokumentiyo kasta ee aad hayso si aad cabashadaada u taageerto. Tusaalooyin waxaa ka mid ah: nuqullada bayaannada lacag-bixinta, rasiidyada, heshiisyo saxiixan, wadahalad kasta ee lala yeesho shirkadda gaadiidka la wadaago, ama xitaa diiwaankaaga shakhsiyeed ee qoraya gaadiid raaca rakaabka.

**Marka aad cabashadaada soo gudbiso ka-dib, waan:**

- Kula soo xiriiri doonaa si aan kuu ogeysiinno in aan cabashadaada helnay. Waxaan ku weyddiin karnaa macluumaad badan ka hor inta aan baaritaanka bilaabin.
- La xiriir shirkadda gaadiidka la wadaago. Waaxda L&I waxay shirkadda gaadiidka la wadaago u sheegi doontaa in aad soo gudbisay Cabashada Xuquuqda Darawalka iyo in aad soo dirto nuqul cabashadaada ah. Marka cabashooyinka la baarayo, shirkadaha gaadiidka la wadaago waa in ay furaan waqti ilaalintooda ka-dibna ay bixiyaan diiwaannada si aan u go'aaminno haddii magdhowga/waqtiga bukaanka ee mushaarka leh lagu leeyahay. Cabashooyinka Xuquuqda Darawalka waxaa ku waajiba shaacin dadweyne.
- Baaritaan ku samee cabashooyinkaaga. Waxaan go'aan ka qaadan doonaa 60 maalmood gudahooda (90 maalmood oo loogu talagalay cabashooyinka aargoosiga) ama waxaan ku soo ogeysiin doonaa haddii aan u baahanahay waqti dheeraad ah oo aan ku baarno.

**Cabashooyinka aanan dadka ka caawin karin:**

- Magdhowga ama eedaymaha kale ee aad sheeganayso ee ah kuwo dhacey ka hor taariikhda dhaqangalka sharciga (1-da Jannaayo, 2023) ama 3 sano ka hor.
- Rakaab gaari ku raacey meel gebi ahaanba ka baxsan Washington.

Haddii uu cabashadaada kaa caawinayo qareen ama u-doode, fadlan ogeysii wakaaladda baareysa.

**Sii-wad ilaa lacag-bixinta xigta ee loogu talagalay foomka.**

F700-219-303 Driver Rights Complaint Form (Somali) 01-2023

For L&I Use Only (Loogu Talagalay  
Istcimaalka L&I oo Keliya)  
Lambarka (#) cabashada



## Foomka Cabashada Xuquuqda Darawalka

Jaangooyooyinka Shaqaaleynta  
360-902-5316 ama 1-866-219-7321

### Qaybta A – Macluumaadkeyga

Luuqadda La Doorbidayo:				
<input type="checkbox"/> Af-Ingiriis	<input type="checkbox"/> Af Amxaari	<input type="checkbox"/> Af Carabi	<input type="checkbox"/> Af-Shiinees La Fududeeyay	<input type="checkbox"/> Af-Shiinees Soo-yaal ah
<input type="checkbox"/> Dari	<input type="checkbox"/> Af-Faransiis	<input type="checkbox"/> Af-Hindi	<input type="checkbox"/> Af Oromo	<input type="checkbox"/> Af-Bunjabi
<input type="checkbox"/> Af-Ruush	<input type="checkbox"/> Af-Soomaali	<input type="checkbox"/> Soninke	<input type="checkbox"/> Af-Isbaanish	<input type="checkbox"/> Af Tigrinya
<input type="checkbox"/> Fiitnaamees	<input type="checkbox"/> Nooc Kale:			
Magaca (Sida uu ugu muuqdo Aqoonsigaaga – Magaca Koowaad Dhexe Dambe)				
Cinwaanka Boostada	Magaalada	Gobolka	Summada Degaanka	
Lambarka Telefoonka	Cinwaan limayl			
Qofka Labaad ee Xiriirka	Lambarka Telefoonka Qof Labaad ee Xiriirka			

### Qaybta B – Shirkadda Gaadiidka ee La Wadaago

Magaca Shirkadda
------------------

### Qaybta C – Faahfaahinnada Taageeraya Cabashadaada

Taariikhda aad bilowdey in aad gaari u wado shirkaddan	Goormee kuugu dambaysay oo aad gaari u wadey shirkaddan?
Cabashadeyda ayaa loogu talagalay muddadan waqtiga ee soo socota	
Taariikhda Billaabidda:	Taariikhda Dhammaadka:

Calaamadee dhammaan kuwa ku habboon:

<input type="checkbox"/> Magdhowga ugu yar ee aanan la bixin	<input type="checkbox"/> Lacago laga jarayo oo aan la oggolaan	<input type="checkbox"/> Ogeysiisyada safarka ee toddobaadlaha ah ayaa maqan/qalad ah/aan dhammeystirnayn
<input type="checkbox"/> Bakhshiiska/lacagaha mahadnaqa ee aan la bixin	<input type="checkbox"/> Waqtiga bukaanka ee mushaarka leh	<input type="checkbox"/> Aan helin ogeysiiska waqtiga bukaanka ee mushaarka leh
<input type="checkbox"/> Bixin la'aanta lacagaha loo bixiyo ka gudubka buundooyinka, ujuurooyinka, ama lacagaha dheeraadka ah ee la saaro iibka ama qofka	<input type="checkbox"/> Shirkaddu ma bixin ogeysiiska xuquuqda ama kuma bixin luuqad la doorbidayo	<input type="checkbox"/> Aargoosi
<input type="checkbox"/> Rasiidka elektarooniga ah ayaa maqan/qalad ah/aan dhammeystirnayn	<input type="checkbox"/> Kuwo Kale:	

Macluumaadka loo baahan yahay si looga baraandego cabashadaada.

*Hadba sida ay u badan yihiin su'aalaha aad ka jawaabi karto, waa sida ugu degdegsan ee aan ugu baraandegi karno cabashadaada.*

Magdhowga / waqtiga bukaanka mushaarka leh ee aad ku leedahay \$ Saacadood:	# saacadaha madasha rakaabka ee la diiwaangeliyay ee muddadan?
--	--

### Sii wad ilaa bogga xiga

F700-219-303 Driver Rights Complaint Form (Somali) 01-2023

Intee jeer ayaa mushaarkaaga lagu siiyaa? <input type="checkbox"/> Maalin kasta <input type="checkbox"/> Toddobaad kasta <input type="checkbox"/> Laba toddobaad kasta	
Maxay ahaayeen maalinta/maalmaha la bixinayo lacagaha magdhowga / waqtiga bukaanka ee aad sheeganeyso?	Ma heshay bayaannada mushaarka? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Ma Garanayo
Ma weyddiisatay shirkadda gaadiidka la wadaago magdhowgaaga / lacagaha bukaanka laakiinse ma lagu diidey? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Ma Garanayo	Haddii ay "Haa tahay", oo taariikhahee ayaad weyddiisay?
Haddii shirkadda gaadiidka la wadaago wax lacag ah kugu leedahay ama aad hayso wax hantidooda ah? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Ma Garanayo	Haddii ay lacag tahay, waa immisaa? \$
Haddii shirkadda gaadiidka la wadaago ay lacag kugu leedahay ama aad hayso wax hantidooda ah? Haddii aad hayso heshiis qoraal ah, waaxda L&I waxay u baahan doontaa nuqul.	
Ma heshay lacag-bixin qayb ah? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Ma Garanayo	Darawalada kale miyaad sidoo kale la siin lacag? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Ma Garanayo
Noo sheeg adiga oo faahfaahinaya sababta soo gudbinta cabashadan iyo sababta shirkadda gaadiidka la wadaago ay ku macneysay lacag-bixin la'aanteed. Waxaad ku soo lifaaqi kartaa warqado dheeraad ah haddii aad u baahan tahay meel dheeraad ah.	
Waa maxay diiwaannada habboon ee aad awoodo in aad bixiso si aad u taageerto cabashadaada? Waxaad midkood ku soo lifaaqi kartaa nuqullada diiwaannadaada ama waxaad goor dambe u soo gudbin kartaa waaxda L&I. <input type="checkbox"/> Siyaasadda waqtiga bukaanka <input type="checkbox"/> Lacago laga jarayo ee la oggol <input type="checkbox"/> Rasiidyada darawalka ee mushaarka leh    yahay ee la qorey <input type="checkbox"/> Ogeysiisyada safarka ee toddobaadlaha ah <input type="checkbox"/> Diiwaannada safarka shakhsiyeed <input type="checkbox"/> Kuwo Kale:	

### Qaybta D – Saxiixa

- Marka aan soo gudbiyo foomkan, waxaan xaqiijinayaa macluumaadka la bixiyay in uu yahay mid sax ah oo run ah. Waxaan sidoo kale oggolahay in aan wada-shaqeyn iyo war-isgaarsiinba la yeesho dembi-baaraha la ii xilsaarey. Magaceyga ku qoran foomkan wuxuu ka dhigan yahay saxiixeyga.

Saxiixa (Ku Qor ama Daabac)

Taariikhda

### Tallaabooyinka Xiga:

- Dib-u-eeg oo daabac foomka.** Hubso in macluumaadka intii suuragal ah uu yahay mid sax ah oo dhammeystiran. Nuqul ka hayso.
- Gudbi foomkaaga – waxaad boostada ugu diri kartaa ama geyn kartaa foomkaaga xafiiska waaxda L&I ee degaankaaga.** Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo helidda halka uu ku yaallo xafiiska degaankaaga? Booqo [www.Lni.wa.gov/Offices](http://www.Lni.wa.gov/Offices).